

## FAAFIN RASMI AH



## JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadk a16aad Muqdisho 28ka Agoosto 1988 L. 2 R 8

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada J. D. Soomaaliya  
 FAAFIN BIL SOO BAXA هريرة شهرية

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar wajiba — RUKUNKA: Sa-  
 nadii waa Sh. 100 Soomaaliya gucaheeda — djabaddoodana  
 waa Shs. 300. Rukunka 1 aweydiisto wuxuu ka bilaaamas 1  
 Jannaayo. Qaimaha qoritaanku F.R. hajkii sadar iyo waxii  
 ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waa la wey-  
 diiyea Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta  
 waxaa lagu bixiayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda  
 Lacagta.

Sannadka 16aad Muqdisho 1da Jannaayo 1988

## K O O B N I I N

QAYBTA

KOWAAD

## SHARCI

QAYBTA

LABAAD

## X E E R

XEER.SHARCI L. 4 ee 1 Agoosto 1988, Wax ka beddelidda Sharci lam. 5 ee 5.11.66, Canshuurta Toosan.	Bog;	620
XEER.SHARCI L. 5 1 Agoosto 1988, Canshuur- ta dhoofidda (tax departure).	»	622
XEER.SHARCI L. 6 ee 1 Agoosto 1988, Banki- yada gaarka ah ee Dalka JDS.	»	624
XEER WASAARADDA K. IYO GAADIIDKA BADDA L. 17 ee 28.6.88, Dhismo iyo da- yactir Jid.	»	626

Xeer sharci lambar 5, taariikh 1da Agoosto 1988: Canshuur-  
ta dhoofidda (tax departure).

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharci lambar 2 ee 29.12.1961: Maa-  
nujka Hantida iyo xisaabaadka Dalwadda;

MARKUU GARWAAQSADAY: Baahida loo qabo in la  
mideeyo canshuurta laga qaado rakaabka duulimaadka caa-  
lamiga ah;

MARKUU TIXGELIYEEY: Talada Wasiirka Wasaaradda  
Maaliyadda;

MARKUU DHEGEYSTAY: Golaha Wasiirrada;

WUXUU XEERIYEEY

Xeer sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Abuurid canshuur

Waxaa la abuuray canshuurta duulimaadyada caala-  
miga ah oo ku waajibaysa qof kasta oo ka dhoofaya garco-  
mada dayuuradaha ee Dalka.

Qod. 2aad

Qiimaha canshuurta iyo qofka ay ku waajibeyso

Qiimaha canshuurta iyo qofka ay ku waajibeyso waa  
la soo socota:

1. Qof kasta oo ajnabi ah waxaa laga qaadayaa 20 doolar  
dhoofitaan kasta.
2. Qof kasta oo Muwaadin ah ama ajnabi deggane ah waxaa  
laga qaadayaa Sh.So. 1.000 (kun) dhoofitaan kasta.

Qod. 3aad

Uruurinta canshuurta

Maamulka canshuurtan waxaa u xilsaaran Wasaarad-  
da Maaliyadda iyo Lacagta, iyadoo la raacayo nidaamka

Qod. 4aad

Canshuur dhaaf

Waxaa canshuurta ka deysan:

1. Rakaabka taransitada ah.
2. Madaxda Qaranka iyo Saraakiisha Dawladda oo shaqo Qaran dibedda u aadaya.
3. Diplomaasiyiinta, Wakiilada iyo Saraakiisha Hay'adaha Caalamiga ah ee leh mudnaan dipolomaasi.

Qod. 5aad

Xeer nidaamiye

Wasiirka Maaliyadda iyo Lacagtu wuxuu soo saari karaa Xeer nidaamiye la xiriira fulinta Sharcigan.

Qod. 6aad

Baabi'in

Waxaa la baabi'iyey sharci iyo xeer kasta oo rakaabka duuli maadyada caalamiga ah saarayey khidmad ama canshuur ka baxsan midda Sharcigan jideynayo.

Qod. 7aad

Dhaqangal

Xeer sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa markuu soo saari xiiso Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faa'iidaha Rasmiga ah, iyadoo loo gudbin doono Golhaa Shacbiga si loogu rogo sharci.

Muqdisho, 3da Agoosto 1988

**MADAXWEYNAHA J.D.S.**  
(Maxamed Siyaad Bare)